# BAYAANKA BADQABKA ISKUULLADA

**Saamaynta ay colaadda hubaysan ku leedahay waxbarashada ayaa keenaysa caqabado degdeg ah oo dhanka bani'aadannimada, hormarka iyo dhammaan dhinacyada bulshada ah. Guud ahaan caalamka, iskuullada iyo jaamacadaha ayaa lala beegsaday qaraxyo, duqeymo iyo gubitaan, halka carruurta, ardayda, macallimiinta iyo howlwadeennada kale ee waxbarashada loo geystay dil, dhaawac, afduub iyo xarig aan loo meeldayin. Dhinacyada ku lugta leh colaadda hubaysan ayaa xarumaha waxbarashada u adeegsaday sida saldhigyo, xeryo ciidan ama goobo ay maxaabiista ku hayaan. Tallaabooyinkaasi ayaa khatar gelinaya ardayda iyo shaqaalaha waxbarashada, waxaana tiro badan oo carruur iyo arday leh ay ka horjoogsanayaan xaqa ay u leeyihiin tacliinta, halka bulshada ay ka reebayaan asaaska ay ku dhisan lahayd mustaqbalkeeda. Colaadaha hubaysan ee ka socda dalal badan oo caalamka ah, ayaa waxay burburinayaan iskuullada waxbarashada iyo weliba rajada iyo hammiga ay qabeen jiil dhan oo carruur ah.**

Weerarrada ka dhanka ah waxbarashada waxaa ka mid ah dhibaatooyinka loo geysto xarumaha tacliinta, aradyda iyo shaqaalahaba. Weerarrada iyo hanjabaadaha weerarrida ah ayaa waxa ay shakhsiyaadka iyo bulshadaba ku reebi karaan dhibaato xun oo saamaynteedu muddo dheer socon karto. Waxaa hoos u dhici kara helitaanka waxbarashada; waxaana joogsan kara adeega ay bixiyaan xarumaha waxbarashada, taasoo keeni karta in ardayda iyo shaqaalaha aanay tegin goobaha waxbarashada, ayagoo u baqaya ammaankooda. Weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo jaamacadaha ayaa loo adeegsaday in lagu huriyo isu-dulqaadasho la'aanta iyo kala saarida, si loo ballaariyo fuquuqa ku salaysan jinsiga, tusaale ahaan in gabdhaha laga horjoogsado waxbarashada, in la kiciyo colaad u dhexeysay qowmiyado kala duwan, in la xakameeyo kala duwanaanta dhaqanka iyo in dadka loo diido xoriyada tacliinta ama xaqa ay u leeyihiin in ku biiri karaan cidda ay rabaan. Marka xarumaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin milateri, waxa ay tallaabadaasi sare u qaadi kartaa khatarta ah in carruurta ay askar ahaan u qortaan dhinacyada dagaallamaya, ama in carruurta iyo dhalinyarada ay u nuglaadaan tacaddiyada galmada ah iyo ku takri falka. Si gaar ahna waxa ay arrintaasi u kordhin kartaa suuragalnimada ah in la weerarro goobaha waxbarashada.

Taa bedelkeeda, waxbarashadu waxa ay carruurta iyo dhalinyarada ka difaaci kartaa dhimashada, dhaawaca iyo ku takri falka; waxa ay khafiifin kartaa saamaynta maskaxeed ee ay colaadda hubaysan reebtay, ayada oo bixineysa xasilooni iyo xiriir ku aaddan adeegyada kale ee muhiimka ah. Waxbarashada "dareensan colaadda" waxa ay ka hortagtaa in ay qeyb ka noqoto colaadda, ayadoo dhanka kale gacan ka geysata nabadda. Waxbarashadu waxa ay asaas u tahay hormarka iyo in si buuxda loogu raaxaysto xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha kale. Waxaan samayneynaa wax kasta oo karaankeena ah si aan u aragno goobaha waxbarashada oo ah kuwo ammaan ah. Waxaan soo dhoweyneynaa dadaallada ay waddamada ku hormarinayaan ayna ku difaacayaan xuquuqda ku aaddan waxbarashada iyo in ay gacan ka geystaan sidii ay waxbarashada usii socon lahayd xaaladaha ay jirto colaadda hubaysan. Sii socoshada waxbarashada ayaa bulshooyinka wahajaya colaadda hubaysan waxay siin kartaa macluumaad caafimaad oo nafta lagu badbaadinayo iyo weliba talooyin ku saabsan khatarta gaarka ah.

Waxaan amaaneynaa howsha uu Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ka qabtay carruurta iyo colaadaha hubaysan, waxaana qireynaa muhiimadda uu leedahay hannaan looga warrami karo, laguna dabageli karo tacaddiyada ba'an ee ka dhanka ah carruurta ku sugan goobaha ay ka socoto colaadda hubaysan. Waxaan hoosta ka xariiqeynaa muhiimadda ay leeyihiin qaraarrada Golaha Ammaanka ee tirsigoodu yahay 1998 (2011) iyo 2143 (2014) kuwaasoo waxyaabaha ay ku baaqayaan ay ka mid yihiin,

in dhammaan dhinacyada ku lugta colaadaha hubaysan ay ka fogaadaan tallaabooyinka waxyeellayn kara in carruurta ay waxbarasho helaan, ayadoo ay qaraarrada ugu baaqayaan dhammaan waddamada xubnaha ka ah in ay ka baaraandegaan tallaabooyin adag oo ay uga hortagayaan in iskuullada ay si ka baxsan sharciga caalamiga ah u adeegsadaan xooggaga hubaysan iyo kooxaha hubaysan ee aan dowliga ahayn.

Waxaan soo dhoweynaynaa samaynta *Tilmaameyaasha ama xeerarka ilaalinta iskuullada iyo jaamacadaha si aanay ciidamada u adeegsan xilliyada colaadaha hubaysan*. Xeerarkan ma aha kuwo sharci ahaan qabanaya dhinacyada ku xadgudba, waana kuwo ikhtiyaar ah oo aan saamayn ku lahayn sharciga caalamiga ah ee hadda jira. Waxaa laga soo qaatay ficillada wanaagsan ee hadda jira, waxaana ay ujeedadoodu tahay in ay bixiyaan hagid sii yarayn doonta saamaynta ay colaadaha hubaysan ku leeyihiin waxbarashada. Waxaan soo dhoweyneynaa dadaallada lagu faafinayo xeerarkan isla markaana lagu hormarinayo in ay meelmariyaan xooggaga hubaysan iyo kooxaha ay khuseeyaan.

Waxaan carrabka ku adkeynaynaa muhiimadda ay leedahay in si buuxda loo ixtiraamo sharciga caalamiga ah, xaalad kasta oo lagu jiro, gaar ahaan baahida ah in loo hogaansamo waajibaadka ku aaddan soo afjarida isla xisaabtan la'aanta.

Anaga oo aqoonsan xaqa loo leeyahay waxbarashada iyo dowrka ay tacliinta ka qaadato hormarinta isfahanka, isu-dulqaadashada iyo saaxiibtinnimada dhammaan dalalka; anaga oo ay naga go'antahay in aan si hormar leh u xoojino in si ficil ah loo difaaco dadka rayidka ah ee ku sugan goobaha colaadda, gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada; anaga oo ay naga go'an tahay in aan ka wada shaqeyno badqabka dhammaan iskuullada; ayaa waxa aan ayideynaa *Tilmaamaha ilaalinta iskuullada iyo jaamacadaha si aanay ciidamada u adeegsan xilliyada colaadaha hubaysan*, waxaana sidoo kale:

- Adeegsaneynaa xeerarkan, anaga oo sida ugu macquulsan oo ugu habboon ku darayna siyaasadaha gudaha iyo hannaanka aan ku shaqeyno;
- Dadaal kasta u galayno in aan heer qaran u ururino macluumaad lagu kalsoonaan karo oo ku aaddan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, dhibbanayaasha weerarrada, iyo iskuullada iyo jaamacadaha ujeedooyinka milateri loo adeegsado xilliyada ay socoto colaadda hubaysan, anaga oo adeegsanayna qaabab ay ka mid yihiin hannaanka ka warramida iyo la socodka ee hadda jira, si aan u sahalno ururinta macluumaadkaasi, isla markaana si aan kala sooc lahayn ugu caawino dhibbanayaasha;
- Baaraynaa eedeymaha xadgudubyada loo geystay shuruucda qaran iyo kuwa caalamiga ah ee xeerarkan khuseeya, isla markaana si waafaqsan u maxkamadeyneyno kuwa tacaddiyadaasi galay;
- Samayneynaa, qaadaneynaa isla markaana hormarineynaa hababka ku salaysan "dareensanaanta colaadda" ee waxbarashada, gaar ahaan barnaamijta gargaarka caalamiga ah iyo hormarka, iyo heerka qaran meelaha ay khuseyso;
- Ku dadaalaynaa in aan xaqiijino sii socoshada waxbarashada xilliyada colaadda hubaysan, taageeridda dib u soo celinta goobaha waxbarashada, iyo in meelaha aan awoodno aan gacan ka geysano iskaashiga caalami ah iyo taakuleynta barnaamijta ku howlan ka hortaga ama ka jawaabida weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, taasoo ay ka mid tahay fulinta bayaankan;
- Taageerno dadaallada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee ku aaddan carruurta ku sugan goobaha ay ka socdaan colaadaha hubaysan, iyo Ergeyga Gaarka ah ee Xoghaya Guud ee

Qaramada Midoobay u qaabilsan carruurtaasi, hay'adaha Qaramada Midoobay ee arrintaasi ku lugta leh iyo kuwa kale ee ku howlan arrintan; iyo

- In aan si joogta ah u kulano, anaga oo casuumeyna hay'adaha caalamiga ah ee ay arrinta khuseyso iyo ururada bulshada rayidka ah, si aan dib u eegis ugu samayno meelmarinta bayaankan iyo adeegsiga tilmaamaha.